**Macluumaad xog ah**

**Oo loogu talagalay Dadka Magangalyo doonka ah ee Pakistan jooga**

Ujeededa xogtani waxaa weeye inay bixiso macluumaad ku saabsn habka loo raaco go'aan ka gaadhida xaalada qaxoontinimo iyo sidoo kale xuquuqda iyo waajibaadka ay leeyihiin dadka qaxoontiga iyo kuwa magangalyo doonka ah ee ku sugan dalka Pakistan gudihiisa.Fadlan si fiican u akhri Xogtan, hadii aad meelaha qaar aad uga baahato iftiimin ama cadaymo dheeri ah waxaad kaalmo ka dalbi kartaa UNHCR iyo xafiisyada la shaqeeya.

## 1. Yaa qaxoonti ah?

Muwaadiniinta afqaanta ah ee dawlada Pakistan ay u soo saartay Cardka cadaynaaya diiwaangalinta (POR) ee aan wali dhicin[1] waxay xukuumada Pakistan iyo UNHCR u aqoonsanyiin qaxoontinimo.Sidaa daraadeed shakhsiyaadka haysta kaadh POR ah oo aan wali dhicin, la marin maayo nidaamka go'aan ka gaadhista xaalada qaxoontinimo (RSD) loo raaco maadama xaaladoodi qaxoontinimo hore loo so aqoonsaday.laakin waxa dhici karta in baahida binu aadanimo ee dhinaca amaanka laga xaal waraysto oo la qiimeeyo (ka fiiri qodobka 2.i) ujeedooyin kale.

Qof kasta oo kele, oo aan ahayn Pakistani waxay UNHCR u aqoonsankarta qaxoontinimo, iyada oo lo marayo nidaamka go'aan ka gaadhista xaalada qaxoontinimo ee shakhsiga, lana buuxinayo shuruudo dhowra. Si laguugu aqoonsado awooda sharci ee UNHCR la siiyay iyo sharciga caalamiga ah ee Qaxoontiga waa inaad muujiso inaad.

- Dibada ka joogto wadankaagii aad ka timi; iyo
- In aanad awoodi karin ama ay jirto cabsi dhab ah oo aad ka qabto in wax lagu yeelo ama dhib laguu gaysto (tusaale ahaan waxaa jira wax khatar ku ah noloshaada, xoriyada ama xuquuqaha kale ee aadanaha);
- oo ku salaysan jinsiyadada, diintaada, dhalashadaada, fikirkaaga siyaasi ama koox gaara oo bulshada aad ka tirsantey ama:
- In aanda ku laaban Karin wadaankaaga aad ka timi waayo waxa jira wax khatar wayn ku ah noloshaada, sharaftada, ama xorriyadada, sababtoo ah dagaal ama rabshado kale oo dalka ka jira awgeed.

Maadama dadka afghanta ah ee hada ku noolyiin Pakistan ay koobanyihiin, waxa laga yaaba in la buuxiyo shuruudaha qeexaya qaxoontinimada, dadkuna waa inay si taxadir le u fikiraan ka hor intayna codsi dhiiban, marina habraac dheer kaas oo u baahan in uu booqasho ku soo noq noqdo xafiiska UNHCR ee ka masuulka ka ah iyo xafiisyada kale ee la shaqeeya.

[1] *kaadhadhka (POR) waxa la kordhiyay mudadi ay dhacayeen ilaa 31ka December ee 2015*

## 2. Sidee baa qof loogu aqoonsan karaa qaxoontinimo?

Pakistan kamay mid ahayn wadamadii saxeexay heshiiskii qaramada midoobay ee 1951 Lana xidhidhay qaxoontiga iyo waliba kii protocolka ee 1967kii, kaas oo farayaa wadamada sexeexay heshiiskaas inay sameeyan nidaamka go'aaminta xaalada qaxoontiga.Pakistan sidoo kale may samayn Shuruuc heer qaran oo qaxoontiga khuseeya, sidaa daraadeed ayaa UNHCR ay qaadatay doorkii dawlada Pakistan ay lahayd isla markaana ay go'aamisaa xaalada aqoonsiga qaxoontinimo.

Maadama oon Pakistan aqbalin sharcina siin dadka qaxoontiga waxa wakiill arintan uga ah hadayada caalamiga ah ee UNHCR.

Si laguugu aqoonsado qaxoonti, waxaad maraysa habab badan waxana dhici karta in kayskaaga lagu lagu diido marxaladahan so socda mid ka mida, talaabooyinki waakan hoos ku qoran iyagoo faahfaahsan:

### i. Qiimaynta Baahida ilaalinta qofka ee lo baahanyay

Talaabada koowaad waxaad maraysaa Qiimaynta Baahida Loo qabo ilaalinta qofka (PNA), qiimayntaas oo sido kale ay heli karaan dadka Afghanta ee carda POR ka haysta. Iyadoo ay ku xidhantey meesha aad dagantey, Si aad u dalbato waraysiga la dhaho PNA waa inaad timaado xafiiska la shaqeeya hayada ama xafiisyada[2] UNHCR lafdooda.

Gobalka kyber pakhtunkhwa (KP)

- Xafiiska UNHCR ee magalada Peshawar, magaalada Peshawar, Charsadda iyo demada Nowshera.
- Xafiiska SHARP ee Kohat (Kohat, Hangu, Bannu, Karak, Lakki Marwat, D.I. Khan iyo Tank)
- Xafiiska SHARP ee Mardan (Mardan, Malakand, Upper and Lower Dir, Buner, Swabi, Chitral and Swat)
- Xafiiska SHARP ee magaalada Haripur (for Haripur, Abbottabad and Mansehra)

Gobalka Bolochistan: SEHER xafiiska magaalada Quetta.

Gobalka Punjab iyo dhulka fedaralka ah ee caasiamda Islamabad XafiiskaSHARP ee Islamabad.

Gobalka Sindh: XafiiskaSHARP ee magaalada Karachi.

Waa inaad la timaado sharcigaaga orajinaalka ah, sida Baasboorka, kaadhadh aqoonsi, shahaadada dhalashada/guurka/furiinka iyo dhimashadaba iyo macluumaadkaaga ku saabsan shaqooyinkaad soo qabatay, waxa la samayn doona copy kuwa orajinaalka ahna dib ayaa laguu soo celin doona.Fadlan iska jir inaad kusoo xarayso sharciyo been abuur ah oo aanu bixin xafiis sharci ahi, maadama aan lagaga

[2] Meelaha ay ku yaalan xafiisyada UNHCR waxa ay ku lifaaqanyihiin dhamaadka xogtan

baahnayn in sheegashadaada aad ku cadayso hab qoraal ah hadana hadii aad so gudbiso sharciyo ama dhukmantiyo been abuur ah waxa dhici karta in la daba galo oo aad ku waydo dalabkaagii.

Sidoo kale waa inaad soo gudbisaa codsi qoraal ah oo ku qoran luuqada aad udhalatay ama luuqad kasta oo aad ku sharaxi karto naftaada, hadii aanad awoodin inaad wax akhrido ama qorto, waa lagu caawin doonaa si qoraal ahaan looga dhigo codsigaaga. Si kastaba ha ahaatee waa inaad awoodaa inaad muujisaa sababta aad u xaraynayso codsigan ku saabsan baahida qiimaynta ilaalinta qofka (PNA) ah.Waa inaad sheegto magacyada qoyskaaga oo dhan, iyo telefoonka lagaala soo hadlaayo iyo waliba halka aad ka dagantay Pakistan iyo taariikhdii aad soo gashay dalkan Pakistan.

Waxa lagu siin doonaa waraaq ay ku qorantay maalinta iyo taariikhda aad mari doonto waraysiga PNA oo ay ka masuulka tahay xafiiska la shaqeeya UNHCR. Waraysiga PNA waxa loo qaada si loo helo xog la xidhiidha baahidaada amaan iyo sababta aad u rabo caawimo.

Maalinta waraysiga PNA waxa lagaa rabaa inaad keento dhamaan inta qof ee qoyskaagu ka kooban yahay oo ay ku jirto caruurta yaryar iyo dadka kale ee ku gu tiirsan. Hadii qof ama hal qof in kabadan oo qoyskaagi ahi aanay soo xaadiri Karin waraysiga, waxaa laga rabaa sababta ay u maqnaadeen. Waxa dhici karta in dib loo dhigo waraysigaaga inta ay soo wada xaadirayaan dhamaan xubnaha qoyskaagu ka kooban yahay.

Xogta aad bixisay waraysiga PNA waxa lala wadaagi doonaa xafiiska UNHCR si loo eego in ay UNHCR gacan ka gaysan karto kiis kaaga iyo inkale, iyado lagu salaynaayo maxsuulkii kasoo baxay waraysigii iyo baahiyihii la ogaaday, waxa laga yaaba in kayskaaga mid ama dhowr ka mida adeegyadan so socda loo gudbiyo.

- Go’aaminta xaalada qofka ee qaxoontinimo (RSD waxa samaynaysa hayada UNHCR;
- Family raadis waxa samayn doona (Xafiiska laanqayrta cas ee caalamiga ah (ICRC);
- Caawmiada la xidhidha sharciga, sida fara galin degdega ah hadii police xidho qof qaxoonti ama si sharci daro ah loo xabiso qofka, gaar ahaane sharciga waafaqsan heshiiska calaamiga ah ee muhaajiriinta ama hadii qoysku isku dhaco
- Latalin/daawayn cilmi nafsiyeed
- Adeeg dawo
- Tababar xirfadeed
- Fursad waxbarasho
- In laga caawiyo oo logu fududeeyo hadii aad dalkagi hooyo ku noqoneyso.
- Qiimaynta Dib u dajin lagu samaynayo dadka afghan ta ah ee haysta Cardka POR ee ay noloshoodu halista ku jiraan.

Go’aankii UNHCR iyadoo si taxadir dheeraada lagu sameynayo dib u eegis waraysigaagii PNA ayaa hab qoraal ah laguugu so gudbin doonaa.

ii. Diwaangelin

Hadii codsiga kiiskaaga qaxooontinimo loo diro nidaamka go’aaminta xaalada qaxoontinimo (RSD), waxa laguu balamin doona hadii aad (dhalasho ahaan afghani tahay) oo aad haysato cardka POR

baadhitaan lagu samaynaayo cardka iyada oo faro lagaa qaadayo si loo galiyo kadyka macluumaadka dabadeedna lo ogaado inu sax yahay, ka dib waxaa lagu dirayaa waraysigii diiwaan galinta.

Maalinta waraysiga, waa inaad soo kaxayso dhamaan xubnaha qoyskaaga oo ay ku jiraan caruurta iyo cidii kale ee kugu tiirsan. Qofka aan soo xaadirin warysiga lama diiwaan galin karo, hadii qof ama in ka badan oo qoyska ka mid ahi aanay soo xaadirin waraysiga diiwaangalinta, fadlan codso in dib laguugu dhigo waraysiga si ay xubnaha kamaqan qoyskaaga kulanka danbe usoo xaadiraan. Hadii qof qoyska kamid ahi anuu waraysiga soo xaadiri Karin sababo ay ka midyiin caafimaadkiisoo culus dartii, naafo uu yahay, ama in la xidhay ama sababo kale waa inaad soo bandhigto (waraaqo caafimaad) oo cadaynaya xaladiisa caafimaad si loo sii wado waraysiga iyadoo aanu soo xaadirin qofka bukaaan jiifka ahi.

Qofka maqan ee qoyska ka tirsan waxa loo baahanyey in la diiwaan galiyo marka ugo horaysa uu awoodo inu soo xaadiro waraysiga. Hadii diwaangalinta kadib ilmo udhasho qoyska fadlan kusoo wargali UNHCR sida ugu dhakhsaha badan, si loo diwaangaliyo ilma dhashay, waxa laga rabaa inaad soo raaciso shahaadadii dhalashada iyo kaadhkii talaalka.

Sidoo kale waa inaad soo raacisa dhukmantiyada (documents) la xidhiidha codsigaaga sida Baasaaboorka, khaadh aqoonsi shahaado dhalasho/dhimasho/guur/furitaan/ iyo xogta ku saabsan hadii shaqooyin aad soo qabatay.

waraysiga diiwaangalinta markaad ku jirto waa inaad sheegta dhamaan  magacyada xubnaha qoyskaagu ka koobanyey oo dhamaystiran (sida magacyada , odayga reerka, xaaska, caruurta, hooyada ,aabaha iyo walaaha) iyo qaraabada dhaw( sida edooyinka, adeerada, awooyo/ayeeyo) ee ku nool dalka Pakistan, sidoo kalena waa inaad cinwaanka gurigaaga iyo taleefan nambarkaga oo sugan aad siiso xafiiska si laguula soo xidhiidho, waxaan sidoo kale xafiiska UNHCR kaaga baahantey taariikhda aad soo gashay dalka Pakistan , sababta aad uga timi wadankaad u dhalatay iyo inaad ku laaban karto wadankaad u dhalatay.

Dhamaan sawirada qoyskaaga  ayaa la qaadi doona wakhtiga waraysiga diiwangalinta, waxaana lagu hayn doona  oo lagu xafidi doonaa xafiiska UNHCR , sidoo kale waxa lagaa qaadi doona saxiixa faraha/suulka, sawirka isha iwm , waxaana  Macluumaadkaaga lagalin doona oo laga baadhi doona kaydka macluumaadka  ee UNHCR si loogu baadho oo lo hubiyo qofka aad tahay.

Wakhtiga waraysiga diiwaangalinta waxaad codsan doontaa luuqada aad doorbidayso in lagugu waraysto iyo wiil ama gabadh cida aad rabto inay kuu turjumto waraysiga RSD.

Dhamaadka waraysiga waxa laguu siin doonaa shahaadadamagangalyo doonka adiga iyo dhamaan xubnaha qoyskaaga taas oo sadexdii biloodba hal mar la cusboonaysiiyo iyo sidoo kale waraaq cadaynaysa wakhtiga lagu balaminayo waraysiga danbe, shahaada qaxoontiga waxa ay cadaynaysaa in dacwad kaaga socoto hayada qaxoontiga aduunka ee UNHCR oo dacwadi kaaga socoto.

iii. <u>Waraysiga RSD</u>

Waraysiga diiwaangalin galinta waxa la raacin doona oo laguugu yeedhi doona waraysiga RSD, hadaba maalinta waraysiga waxa lagaa rabaa inaad keento dhamaan magacyada qoyskaaga (fadlan dib ufiiri qaybta 2.ii), sidoo kale waraaqda wakhtiga balanta ee lagu siiyey maalinki hore. Marka ay UNHCR go’aansanayso in qaxoonti ahaan laguu qaabilo waxay ay ku xidhantahay hadalada sheegashadaada

dacwadaada marka ku dadaal inaad runta sheegto, waa inaad ku taageerto doodaada waxii macluumaad ah (documents) si ay u taageeraan dacwadaada. Sida kaadh aqoonsi, kaadh aqoonsi oo milatari hadad ka shaqaysay milatari, iskuul ama jaamacad hadaad shahaadooyin ka haysato, xisbi siyaasi ah hadaad aqoonsi ka haysato iyo shahaadooyinka dhalashada/dhimashada/guurka/furiinka/shaqada, iyo waraaqo cadayn in jeel laga so daayaya, waxa ay caawinayaan oo ay fududaynasyaa dacwadaada, fadlan soo raaci.

Waa masuuliyadaada inaad ku caawiso UNHCR inay qiimayso sheegashadaada adigoo u sheegaya run iyo wax xaqiiqooyin ah oo ku gu saasban. Sikastaba ha ahaatee UNHCR way ka warqabtaa in dadku ayna wada heli Karin waraaqo cadayn ah oo ay kala yimaadaan dalkooda, sidaa darted hadaad awoodi waydi inaad cadaymo keento wax dhib ah kugu keeni mayso halka dhukmantiyada (documents) been abuurka ahi ay sababi karaan in la xanibo dacwadaada.

Fadlan la soco in laguu yeedhi doono waraysiyo marar kala duwan si meelaha qaar wax lagaga waydiiyo.

**<u>iv. Go’aanka heerka koowaad ee RSD</u>**

Waraysiyada kadib, waxa lagugu soo war galin doonaa hab qoraal ah hadii qaxoonti ahaan laguu aqbalay iyo hadii kalaba.  Fadlan lasoco in nidaamka RSD in uu qaadan karo mudo bilo ah, gaar ahaana kiisaska ad adag.

**Aqoonsiga**

Hadii laguu aqoonsado qaxoonti, UNHCR waxay kugu yeedhi doonta xafiiskeeda si laguu siiyo khaadhka qaxoontiga adiga iyo xubin kasta oo kamid ah qoyskaaga. Khaadhkani waxa uu ku dhacaya mudo 12 bilood gudahood ah waana la cusboonaysiin karaa. Kaama caawin doono khaadhku inaad waliga ku sii noolaato Pakistan laakiin waxa uu kaa caawinaya in aad si ku meelgaadh ah ugu noolaato Pakistan oon qasab laguugu celin Karin dalkaagii, sidoo kale UNHCR waxay isku dayaysaa inay kuu raadiso xal waara.

**Diidmada**

Hadii codsigaaga  qaxoontinimo la diido waraysiga RSD-da kadib, waxa aad heli doonta waraaq ka socota UNHCR oo sharaxaysa sababta laguu diiday.waraaqda waxa sidoo kale laguuga sharaxi doonaa inaad xaq u leedahay inaad rafcaan (appeal) ka qaadato diidmado oo aad u dirto xafiiska UNHCR ee qaabilsan dacwadaada si dib u eegis loogu sameeyo. Anbiilka waa in bil guhadeed aad ku gudbisid bishaas oo ka bilaabmaysa maalinta aad hesho diidmada.

**v. Rafcaanka<u> ka dhan ah diidmada koowaad</u>**

Hadiii aad doorato inaad rafcaan qaadato  diidmadii koowaad ee dacwadaada waa inaad soo gudbiso cadaymo qoraal, waxa lugula talinayaa inaad akhrido waraaqda UNHCR sababaha ay kuugu diiday qooxoontinimo,tusaale ahaan haday tahay sababta aanad did ugu noqon Karin dalkaagii, amaba hadii ay jirto is fahanwaa xaga luuqada ah wakhtigii waraysig a RSD-da  lagaa qaadayey. Tusaale ahaan is fahmi waa xaga luuqada ah oodhacay wakhtigii waraysiga lagaa qaadayey, waa inaad arimahan ku cadayso waraaqda anbiilka.

Waraaqda anbiilka waa inaad u gudbisaa xafiiska UNHCR ee khuseeya dacwadada amaba xafiis kale oo UNHCR la shaqeeya, waxaana dhici karta in laguugu yeedho waraysi ku saabsan anbiilka aad dalbatay amaba go; aanka la gaadho iyadoo la cuskanayo anbiilka aad soo qoratay.

Waraysiga anbiilka iyo go’aankiisaba waxa kula yeelan doona qof ka duwan qofkii kolkii hore ku waraystay wareysigii RSD si loo hubiyo oo si madax banana dib laguugufiiriyo *dacwadaadi.*

**vi. <u>Goaanka Rafcaanka (appeal)</u>**


*Xukunkii koowaad hadii labadalo*

Hadii go’aanki koowad ee diidmada lagu badalo marxalada anbiilka, ka dib waxa lagu siinaya kaadhka qaxoontiga, waxayna UNHCR kuu aqoonsanaysa qaxoonti adiga iyo dhamaan xubnaha uu ka koobanyahay qoyskaagu, kaadhadhkani waxay ku dhacayaan mudo 12 bilood ah, waxaan lagu cusboonaysinaya marka ay dhacaan. Kaadhkani xaq kuuma siinayo inaad si joogto ah u dagto dalkan Pakistan, laakiin waxay kuu saamaxayaan inaad si ku meelgaadh ah aad ugu noolaato Pakistan oon lagu mastaafurin Karin, isla markaana UNHCR waxay kaa caawin doona inaad hesho meel aad si joogto ah u dagto ood ku nagaato.

**Hadii go’aankii hore ee diidmada la qaato**

Hadii go’aankii hore diidmada la qaato, oo doodaadii marxalada anbiilka lagu diido xaq uma lihid inaad mar labaad rafcaan soo qorato, waraaqdii lagu siiyey ee magangalyo doonka dib laguuguma cusbaysiin doono, dacwadii aad ka furatay xafiiska UNHCR waa la xidhayaa, sidoo kalena xaq uguma lihid wax caamimo ah xafiiska UNHCR, ama xafiisyada ay shaqo wadaagta leeyihiin ee ay ku siiyaan . Hadii aad sii joogto dalka Pakistan iyadoo waraaqdii qaxooontiga (protection letter) kaa dhacday waxa lagugu qaadaya qawaaniinta muhaajiriinta ee u dagsan dalkan Pakistan, taas oo macnaheedu yahay waa lagu xidhi karaa, laguuna mastaafurin karaa dalkaad u dhalatay.

***Sawirkan soo socda waxaa loo qaabeeyay in lagu sharxo guud ahaan marxaladaha ay marayso dacwadaada waraysiga PNA***



**vii. <u>Waajibaadka saaran dadka magangalyodoonka ah iyo Qaxoontiga</u>**

- Dhamaan inta aad joogto Pakistan waa inaad u hogaansantaa sharciyada udajisan jamhuuriyada islaamiga ah ee Pakistan.
- Hubi markasta in xafiiska UNHCR uu kawar qabo meesha aad dagantay cinwaankaaga iyo teleefan nambarkaaga, hadii aad mid kamid ah badasho markaba war gali xafiiska UNHCR.
- Markasta sii Xog xaqiiq iyo run ku salaysan xafiiska UNHCR kalana shaqee arimaha ku saabsan dacwadaada qaxoontinimo
- Wakhtiga balanta ilaali si isku mid ah xafiiska UNHCR iyo xafiisyada la shaqeeyaba.
- Xafid oo ilaali dhukmantiyada (documents) ay ku siiso UNHCR iyoxafiisyada la shaqeeyaa, waa inaad wadato wakhti kasta sharciyadaaada original ka ah hana u ogolaan in uu qof kale qaato oo uu isticmaalo, hadii police dalka Pakistan ku waydiiyo sharcigaaga fadlan la shaqee oo tus sharciyada lagu siiyey, fadlan hadii ay kaa lumaan ama jeexmaan ku wargali xafiiskii bixiyey si degdeg ah.

**viii. <u>Xuquuqda iyo khidmadaha la xidhiidha Hab raaca RSD</u>:**

- Waa in aan si khasaba dib laguugu celin wadankaagi aad u dhalatay ka dib marki lagu diiwaan galiyay qof magan galyo doona, ka dibna lagu mariyay nidaamka RSD ee lagu anqoonsaday Qaxoontinimo (Qaaxidada inan qofka dib lo celin).
- Waxaad xaq u leeday in dhamaan macluumaadkaagi (hadal iyo qoraalba) ay uriiriyeen UNHCR IYO xafiisyada la shaqeeya in tii uu socday hawl galadu si sir ah loo ilaaliyo waxa kaliyaata loo isticmaalaya go’aan ku qaadashada kiiskaaga qaxoontinimo iyo khidmad kasta oo kale oo lagu siinayoba. UNHCR waxay u baahantey inay macluumaadkaaaga la wadaagto cid kale oo sadexaad (sida xukuumada Pakistan, ururada aan daawliga ahayn iyo xafiisyada kale ee UNHCR kalaa shaqeeya inta hawl galka RSD. Ka hor inta aan cid la la wadaagin wax macluumaad ah waxa lagu waydiin doona ogolaanshahaaga iyo sidoo kale inaad saxeexdo. Hadii UNHCR ubaahato inay wax macluumaada la wadaagto xukuumada wadankaagi ,UNHCR lama wadaagaayso ilaa ay adiga ogolaansho ka hesho oo aad raali ka noqoto taas oo aad xaq u leeday
- Waxaad xaq u leeday inaad keento dhukumenti taageeraya sheegashadaada qaxoontinimo heerkasta oo ay dacwadu marayso.
- Waxaad xaq u leeday inaad codsato turjumaan iyo in waraaqo lagu tarjumo ba.

**ix<u>. Xalka waara oo gaar u ah dadka qaxoontinimo loo aqoonsaday</u>**

Xeerka caalimiga ah ee qaxoontiga, waxaa uu dhigayaa in qaxoontinimadu ay tahay xaalad ku meel gaadha sidoo kale hayada UNHCR waxay raadinaysaa xal waara.

Caalamka waa jira sadex nooc oo xal waara ah:

a) in si mutadawacnimo ah wadanki hooyo dib loogu celiyo

b) in wadanka magangalyo doonka ku yahay degenaansho iyo dhexgal bulsho looga raadiyo
c) in dib udajin wadan sadexaad loo diro

## a) <u>Dib celinta mutadawacnimada ah</u>

Dib celinta mutadawacnimada ah waa xalka waara ee ugu haboon inta badan qaxoontiga caaalamaka, marka aad dib u dhexgashid bulshadii wadankaagi hooyo waxaad leeday xuqiiqdii muwaadinka kaas oo aanu jirin wax xaalad sharci ah oo lagu doorsan karo.

Hadii aad gaadho go’aan xora oo ah inaad wadankaagi dib ugu noqonayso(ka dib marki aad ogaatay wadciga iyo xaalada meesha aad ku laabanayso iyo caawimada aad heli karto ), waxaad xaq u leeday inaad caawimo bilaa lacaga ka hesho UNHCR marka dib laguu celinaayo.

Hadii aad rabto macluumaad dheeraada oo ku saabsan caawimada aad heli karto iyo nidaamka la maraayo waxa lagu siinayaa qoraal cinwaankisu yahay FAQs (oo ah su’aalaha soo noqnoqda ee had iyo goor lays waydiiyo) eek u kusaabsan dib ucelinta mutadawacnimada ah ee qaxoontiga afghanta ah ee laga heli karo UNHCR iyo xafiisyada la shaqeeya. Qaxoontiga aan afghanta ahayn waxay tagi karaan UNHCR haday u baahdaan inay helaan Macluumaad gaara.

**<u>Dhex galka bulshada aad la joogto</u>**

Dhexgalka bulshada wa arin sharci ah, laakin helitaanka degenaanshiiyo rasmi ah wadankan Pakistan suurta ga kama aha, si kastaba ha ahaate iyadoo lagu salaynayo duruuftaada gaarka ah iyo baahidaadi kiiskaaga laga ogaaday, UNHCR iyo xafiisyada la shaqeeya waxay ka caawin karaan waxyaabo kooban si xaaladaada dhaqan dhaale ee wadankan ay kor u qaadaan iyada oo sido kalena wadanka Pakistan kala shaqayn doonto si deganaansho wakhti dheera ah in lagaaga helo Pakistan. Qiimayn ka dib Hadii markaa la ogaado in xalkan waara yahay mid ka ugu ugu haboon, UNHCR way kugula talinaysa laakin hadhaw si firfircoon kuma lug yeelanayso arimaha sharciga ee joogitaankaaga Pakistan maadama dawlada Pakistan ay gacanta ku hayso xaaladaada sharci yeed.

**<u>Dib u dajinta (Resettlement)</u>**

Xalwaara ahaan Dib u dajinta/resettlement waxa kaliyata oo heli Kara qaxoontiga buuxiyay shuruudo kooban islamarkaana xaalooda nabad galyo ay aad u xuntey sida ay qeexeen wadamada qaxoontiga qaata iyo UNHCR. Wadamada qaxoontiga qaata waxay qaataan dad aad u yar sanadkii. In ka yar 1% ayaa caalamka oo dhan hela fursadan dib udajinta.

Marka aad ucadaynayso UNHCR baahi dib u dajin , xaq uma lihid in lagu siiyo dib u dajin laakin UNHCR waxay samayn karta inay xaalka aad ku sugantay inay ku qiimayso oo ay waraysi arintan ku saabsan kuugu wacdo. Si kasta ahaate go’aanka cida dib u dajinta lo ogolaaday waxa iska leh wadamada qaxontiga qaata mana aha UNHCR.



## X. Lacagta kharashaadka

Dhamaan khidmadaha iyo caawimada (oo ay ku jirto khidmada ay bixiyaan hayada la shaqeeya UNHCR sida SHARP, SEHER, SACH, ICMC iyo IOM) **waa kuwo bilaa lacaga.**

Dalabkasta oo uu la yimaado qof ka mida shaqaalaha UNHCR iyo hayadaha la shaqeeya ay wax lacaga dalbadaan ama ixsaan kale oo ay waydiiyaan dadka magangalyo doonka ah waa in si dhakhso ah oo toosa loogu so wargaliyo UNHCR ama nidaamka loo sameeyay ee cabashooyinka oo ah inaad waraaq cabasho ah aad ku rido sanduuqyada la dhigay UNHCR iyo dhamaan xafiisyada hayadaha la shaqeeya. Sanduuqyadan cabashooyinka waxa fura oo waraaqa ka saara shaqaale gaara oo lo qoondeeyay waxaana loola dhaqma si sir ah. Wadashaqayntaada la xidhiidha arintan habka loo go’aamiyo xaalada qaxoontiga iyo khidmadaha kale ee ay UNHCR bixisaba waxay sii ahaanayaan bilaa lacag.

## xi. Dhaqan xumo uu ku kaco shaqaale ka tirsan UNHCR ama xafiisyada la shaqeeya

Hadii qof shaqaale UNHCR ama xafiisyada la shaqeeya uu kugu sameeyo noockasta oo anshax darro ah, waa inaad ka warbixiso adigo maraya nidaamka cabadashada aan sare ku so qeexnay kaas oo laga dhigayo sir. Dhaqan xumada waxa kale oo si toosa loogu wargalin karaa xafiiska Kormeeraha Guud ee UNHCR ee Xarunta wayn ee Geneva.

Dhaqan xumada waxa ku mida, kaliyaatana aan ahayn: codsi in lacag ama wax kale la ga dhiibo adeeg loo sameeyay; musuqmaasuq, ku xadgudub jirka ah; hanjabaad; dhibaataynta; amar ku taagleyn; si khalada u dhigid shahaado been ah oo la xiriira dheefaha ama sheegashada; dhiig-miirashada galmada ama xad-gudub.

Habka cabashada waa inaan loo isticmaalin si aad u codsato dib u eegis go'aanka RSD ee kiiskaaga ama wax weydiimo kale oo RSD la xiriira.

Ha dii aad rabto in cabasho gudbiso, waxa lo baahanyay in aad ku so qorto magacaaga, dhalashadaada, iyo meelaha lagaala so xidhiidhayo, maaadama aan UNHCR si firfircoon ayna cabashooyinka qaar ayna u daba gali Karin.

Cabasho so gudbintu si taban u saamayn mayso sheegashadaadi qoxoontinimo ee UNHCR iyo qiimayn kasta oo kale oo ku saabsan kiiskaaga.

Fadlan waxa lagugula talinayaa inaad run ka sheegto markaad cabasho samaynayso, shuruucda maxaliga ah xaasidnimada ama eedayn been abuur ahi waxay dhali karaan cawaaqiib.

## **LIFAAQ**

<u>UNHCR iyo Hayadaha la shaqeeya Meelaha lagala xidhiidhayo:</u>

Hadii aad joogto Islamabad, Fadlan la xiriir SHARP office in Islamabad

**<u>Islamabad</u>**
Xafiiska SHARP Islamabad
Cinwaanka: Numberka Guriga. 279-A, Nazim ud din Road, F-10/1, Islamabad
Furan: Isniinta - Khamiista (0800-1630 Saac) …Jimcahana (0800-1230 Saac)
Tel: 051-2211621, 2211740
Fax: 051-2212773
*Khatka hotline numberka*: 0334-1112004

**<u>Lahore</u>**
Xafiiska SHARP ee Lahore
Cinwaanka: Numberka Guriga. 365, PAK Block, Allama Iqbal Town, Lahore.
Furan: Isniinta- Khamiista (08:00-16:30 Saac) … Jimcahana (08:00-12:30 Saac)
Tel: 042-37800710-37800711
Fax: 042-37495030
*Khatka hotline numberka*: 0334-111 2005

*Meesha aad ka joogto Gobolka Khyber Pakhtunkhwa, Fadlan kala xiriir*:

Peshawar:
Xafiiska SHARP ee Peshawar
Cinwaanka: 1 Gul Mohar Lane, University Town
Furan: Isniinta - Khamiista (08:00-16:30 Saac) ……. Jimcahana (08:00-12:30 Saac)
Tel: 091-5842375/6
Fax: 091-5842102

**<u>Deegaanada kale</u>**
Xafiiska SHARP ee Kohat
Cinwaanka: Numberka Gurig.102, Sector-9, KDA, Kohat
Saacada Shaqada: Khamiista (08:00-16:30 Saac)…. Jimcahana (08:00-12:30 Saac)
*Tel:* 0992-513792
*Khatka hotline numberka:* 0315-5009503

**Xafiiska SHARP ee Mardan**
Cinwaanka: Numberka Gurig. 162, Street 5, Sector-K, Sheikh Maltoon Town, Mardan
Saacada Shaqada: Khamiista (08:00-16:30 Saac)…….. Jimcahana (08:00-12:30 Saac)
*Tel:* 0937-840379
*Khatka hotline numberka:* 0315-5009502

**Xafiiska SHARP ee Haripur**
Cinwaanka*:* Talokar Road, Near Railway Crossing, Street no.1, Haripur City
Saacada Shaqada: Khamiista (08:00-16:30 Saac) … Jimcahana (08:00-12:30 Saac)
*Tel:* 0995-612023
*Khatka hotline numberka:* 0315-5009501

*Hadii aad joogto **Gobolka Baluchistan**, Fadlan kala xiriir:*

**Xafiiska SEHER EE Quetta**
Cinwaanka: Shalimar Bungalows, Banglalow # 5 (near NADRA office), Airport Road, Quetta
Saacada Shaqada: Isniinta ilaa Khamiista (09:00-17:00Saac)….. Jimcahana (08:00-12:30 Saac)
*Tel*081-2301626
*Numberka Mobileka ballanta*. 0333-7819143 (10:00-16:00)

*Hadii aad joogto Gobolka Sindh, Fadlan kala xiriir*

**Xafiiska SHARP ee Karachi**
Cinwaanka: Numberka Guriga B-108, K.D.A Scheme 24, Block 10, Gulshan e Iqbal, Karachi
Saacada Shaqada: Isniinta ilaa Khamiista (08:00-16:30 Saac) … Jimcahana (08:00-12:30 Saac)
*Tel*: 021-34811571, 34972697
*Fax*: 021-34812184
*Khatka hotline numberka*: 0334-1112008

**Xafiisyada UNHCR ee Pakistan**

**Xarunta UNHCR ee Islamabad**
Cinwaanka: PO Box 1263, Diplomatic Enclave – 2, Quaid-e-Asam University Road, G-4, Islamabad
Saacada Shaqada: Isniinta ilaa Khamiista (08:00-16:30 Saac) … Jimcahana (08:00-12:30 Saac)
*Tel:* 051-2829502-6
*Fax:* 051-2279455
*Khatka hotline numberka:* 0300-5018568
*E-mail:* pakisprt@unhcr.org

**Xafiiska laanta UNHCR ee Peshawar**
*Cinwaanka*: 1 Gul Mohar Lane, University Town
*Saacadaha Shaqada*: Isniin-Khamiis (08:00-16:30)… Jimcahana: (08:00-12:30)
*Tel*: 091-5842375/6
*Fax:* 091-5842102

**Xafiiska laanta UNHCR ee Quetta**
*Cinwaanka*: Numberka guriga 36-E, Chaman Housing Scheme, Quetta
*Saacadaha Shaqada*: Isniin-Khamiis (08:00-16:30) …..Jimcahana: (08:00-12:30)
*Tel*: 081-2828964, 2829368 or 2829369
*Fax*: 081-2829370
*Khatka hotline numberka*: 0333-7819601

**Xafiiska UNHCR ee Karachi**
*Cinwaanka:* Bungalow #F/65, Block-4, KDA Scheme-5, Kehkeshan Clifton, Karachi
*Saacadaha Shaqada*: Isniin-Khamiis (08:00-16:30) …Jimcahana: (08:00-12:30)
*Tel:* 021-35833787
*Fax:* 021-35862213
*Khatka hotline numberka:* 0342-2704888

Website ka UNHCR ee Pakistan: http://unhcrpk.org

Xafiiska Kormeeraha Guud ee UNHCR

E-mail: inspector@unhcr.org
Fax sir ah: +41-22-739-7380
Cinwaanka waraaqaha lagu diraayo: UNHCR, Case postale 2500, CH-1211 Geneva 2 Depot
*Khatka hotline numberka*: +41-22-7398844